



QORAAL MAGUURTO L. 133/1975

KALA GADASHO CAD DHUL AH OO UJEEDDADIISU TAHAY DHISMO

Maanta oo ah 31ka bisha Agoosto 1975, WAKAALADDA DHISMAHA SOOMAALIYEED oo saldhiggeedu yahay Muqdisho, Wadada 1da Luulyo, laguna dhisay sharciga lr.8 ee 31kii Juunyo 1968, loona dhisay inay hormariso dhismaha Guryaha Dadweynaha, kuna hormariso dhismo qeymo yar, oo haddana Wasaaradda Maaliyadda ay siisay khaasna uga dhigtay dhulka ku yaal Muqdisho, Xaafadda Guryaha Dadweynaha (Quart. Case Popolari) kuna tilmaamen Deke-rectda lr.172 ee 14/7/1972. - - - - -

Wakaaladdaas oo wakiil uu ka yahay Agaasimahaada Guud Ing. SHARIIF AXMED CUMAR iyo CALI CABDI KERSI, Soomaali ah, ku dhashay Hargeysa 1941, haddana deggan Muqdisho, waxay ku heshiiyeen inta soo socota oo ah kala gada- sho cad dhul ah oo ujeeddadiisu tahay dhismo iyo xugu- uqda ku saabsan oo dhan. - - - - -

Sida kor lagu soo sheegay, Ing. Shariif Axmed Cumar, oo ka wakiil ah Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed, wuxuu heshiiskan ku caddeynayaa in isla Wakaaladdaas ay ka iibisay Jaalle Cali Cabdi Xersi, oo isaguna isla heshiiskan ku caddeynaya inuu ka gatay aqbalayna cad cad dhul ah oo ujeeddadiisu tahay dhismo; Dhulkaasoo ku yaalla Muqdisho, Xaafadda Guryaha Dadweynaha lr.62/B; Waxaa kaleo labada dhanba ay heshiiskan ku caddeyna- yaan in qiimaha dhulkaas lagu kala gatey uu yahay

Registrazione Mogadiscio 3/8/75
al n. 250 AHJ Vol. 22
Esatto Sh. 30. 10090 P. 156
sh. 30. 156
PROCURATORE F.to

lacag ah Sh. So. 2.800/=(laba kun siddeed boqol shilin)

lacagtaasoo gatahu uu wada siiyay Wakaaladda Dhismaha

Soomaaliyeed, sida labada barbarba ay ii caddeeyeen.-

Waxaa kaloo labada dhinac ay caddeeyeen kuna heshii-

yeen in shuruudaha ah (le condizioni) iyo habka kala

gedashada dhulkaas ay yihiin kuwa soo socda: - - - -

1.-In Gataha (il compratore):

A) UU heshiis kaan ku milkiyay dhulkaas uu gatay, laga
iibshay. - - - - -

B)-Inuu hagaajiyo naqshadda ku saabsan guriga lagu
dhiseayo dhulkaas la soo sheegay, kuna dhiso guriga
muddo 6 (lix bilood ah) oo laga billaabo maalinta la
aqbalo naqshada guriga (approvazione Progetto). - - - -

F)-Inuu waafajiyo dhismaha guriga nidaanka "le norme"
sharciga dhismaha (edilizia) iyo nidaanka xeerka Caa-
fimeadka (regolamento sanitario). - - - - -

2.-In Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed:

A)-ay ilaaliso, ilaalina karto si dhismaha guriga
u waafaqo, naqshadda la ansixiyay (il progetto Appro-
vato). - - - - -

B)-In Muddo ah illa 5 (shan) sano oo laga billaabo-
maalinta guriga dhismahiisa la dhammeeyo, gatahu uusan
iibin karin amase ijaari karin dhulkaas iyo guriga -
laga dhisay dhammaan amase qeyb ka mid ah, haddii Wa-
kaaladda Dhismaha Soomaaliyeed aanay u oggolaan oo
ruqsad u siin. - - - - -

T)-Gudasho la'aan (inosservanza) shuruudeed iyo maddo.-

1.-Gudasho la'aan shuruudaha ku qorab qeybta B waxay keeyneysaa inuu heshiiskan jabo (la risoluzione) iyo inuu bixiyo gatuhu ganaax la mid ah 25% oo qiimaha kala gadashadaani. - - - - -

2.-Gudasho la'aan shuruudda ku qoran qeybta T waxay keeneysaa in gatuhu bixiyo ganaax la mid ah 25% oo qiimeha kala gadashadaan. - - - - -

3.-In dhulka heshiiskan lagu kala gatay soohimahiisu yihiin kuwa soo socda: - - - - -
Konfur waxaa ka xiga 63/B, Wogooyi waxaa ka xiga 61/B,
Galbeed waxaa ka 64/B, Barina waxaa ka xiga Waddo aan laami ahayn. - - - - -

4.-In gatuhu caddeeyay una aqbalay haddii uu gudan waayo shuruudaha lagu soo sheegay qeybta B usan xaq u lahayn in loo celiyo kharajka kaga baxay heshiiskan, ha noqdo canshuur iyo mid kaleba. - - - - -

5.-Gatuhu wuxuu misna caddeynayaa inuu aqbalay dhammaan shuruudaha ku qoran qeybaha: A, B, iyo T ee heshiiskan. - - - - -

6.-In dhammaan kharajka kala gadashadaan uu bixinaayo gataha siduu caddeeyay. - - - - -

Agasimaha Wuxuu ee DH.Soomaaliyeed

Ing. SHARIF CUMAR

1)-



2)- Jaalle CALI CABDI XERSI

M. Xirsi

Rep.n. 5755

KAFIISKA NOTAAYAHA XAMAR

Aniga Dr.Muusa Xuseen Sadiiq, ahna Notaayaha Muqdisho, waxaan
oodeynayaa labada saxiix ee mid uu ku qoran yahay bogga gadaale
kan kalena isla waqaddaan boggeeda 4aad, ay yihiin kuwii runta
ahaay ee Jaallaynasha, Ing.Shariif Axmed Cumar, Seemaali ah, ku
dhashay Muqdisho 23/5/1943, haddana deggan, ee ah Agaasimaha
Gund ee Wakaaladda Dhisaha Seemaaliyeed, iyo Cali Cabdi Xirsi,
Seemaali ah, ku dhashay Margaysa 1941, haddana Deggan Xamar, ee
ah Farsamayaaqan Dhisno. - - - - -
Muqdisho, 31ka Agoosto 1975.-

NOTAAYAHA

Dr.Muusa Xuseen Sadiiq.-



M. Xirsi

RepNo: 86201/23

W.DH:(400-MQ)

Cotto: 62-B

Tv: 12-11-2023



(2)

2. Wakaaladdu waxay kaloo daw u leedahay inay kormeerto dhismaha guriga ama bilow ha ahaado ama dhamaad ah ahaadee. Haddi ay dhacdo in dhisku uusan waafaqsaneyn heshiiskan ka mid ah heshiisyada ku qoran ruqsaddatan wakaaladdu waxay xaq u leedahay inay dhiska joojiso.

Wakaaladdu waxay kaloo daw u leedahay inay kormeerto dhismaha guriga bilow ha agaado ama dhammad ha agaadee.

Haddi ay dhacdo in dhisku uusan waafaqsaneyn heshiiska ka mid ah heshiisyada ku qoran ruqsaddan wakaaladdu waxay xaq u leedahay inay dhiska joojiso.-

Waxaa la siin karaa degaha ogeysiis qoran oo laga dalbayo bedelaad iyo xaq la mid ah hadday iyo waxa la mid ah hadey muuqato inuu yahay lagama maarmaan sida heshiisku u noqdo mid la dhowro.

Ruqsaddan waxa lagu dhaqmi karaa muddo ah hal sano waaana la kordhin karaa muddada iyada oo marka la soo qoran doono codsi inkastaba mudada iskudarkeedu waa inaysan ka badan 3 (saddex) sano oo ah muddada la doonayo in dhiska lagu dhameyo.

Haddii deguhu uu dhiso ama bilaabo dhiska isagoo aan ka heysan ruqsad wakaaladan, wakaaladdu way ku weydiisan kartaa ogeysiis qoran inuu dumiyo ama durkiyo dhiskaasi ama cad ka mid ah ama bedelaad shaqadeedana uu ku dhameeyo waqtiga ogeysiiska lagu qabto, taa waxaa dheer oo la weydiisan karaa in haddii wax kaga qaban waayo muddadaasi, wakaaladdu waxay ku dhaqaaqi shaqadaasi dumiska; durkiska ama bedelaada ah isla markaana ay ka jarto degaha wax alaale wixii kharash ku baxa shaqadaas.-

Dehaha ma uu degi karo mana dejin karo qofna guriga cusub jeer wakaaladdu ay caddeyso in gurigaas uu hagaagsan yahay lana deg karo.

Xaashida degmada waxa bixin doonta Wakaaladan.

Xaxiixa Degaha..~~CALI XIRSI CABDI XIRSI~~.....

XAXIIXA QOFKA KU HADLAYO
MAGACA WAKAALADDA DHISMAHA

JAALLE.....~~CALI XIRSI CABDI XIRSI~~.....

MAXAMUUD MAXOW JIJAALE

TAARIIKH. 9.5.78.....

M/t.



Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed

Xashida lacag — Gurka Qiimaha

Dhulka — Naqshada Fasaxa Guridhis

Rasid № 13023

Waxaa laga qabtay Jaalle Ali Cabdi Xirsi

Lacag gaadha Sh So. 2.800/- (laba kun iyo siddeed Boqol

oo ah sababta kor ku taalla awgeed. waa Qiimadkud)
L. 62/B - 400 mq.

Xamar, 16/8/75

